



Wararkii ugu Dambeeyey ee Dayrta 2020: Dhammaan Ardayda Waxaa Quraacda iyo Qaddada Lagu Siinayaa Lacag La'aan

Sebtembar 22, 2020

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Iyada oo aan ku jirno sanad-dugsiyeedkii 2020-21, waxa aan ku faraxsanahay inaan idinla wadaagno wararka ku saabsan cuntada iskuulada laga bixiyo. Anaka kaashaneyna Wasaarada Beeraha Maraykan, waxaan awood u yeelan doonaa in aan waqtigani **dhammaan ardayda iskuulada oo dhan aanu siino cunto bilaash ah.**

[Wasaarada Beeraha Maraykan\(USD\) waxa ay ku dhawaaqday](#) inay sii wadi doonto barnaamijki dhammaan ardayda lagu siinayey quraacda iyo qaddada bilaa lacagta aha intii lagu gudo jiro xilliga xaggaaga. Haddii aanu nahay Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS), taasi macnaheedu waxa weeye inaan aan awood u leenahay inaan sii wado in aanu **siino cunto u dhiganta todobada maalmood ee tobadaadka ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland oo kaliya, laakiinse dhammaan caruurta Portland ee da'doodu u dhaxayso 1 sanno ilaa 18 sanadood.**

Markii [aanu ku dhawaaqnay bishii Ogosto](#), inaanu **kordhinay goobihii cuntada laga bixinayey ee iskuulada oo aan ka dhignay 38 goobood** halkaasi oo qoysasku ay ka soo qaadan karaan quraac iyo qado la sii diyaariyey maalmo gaar oo la doortay, laga bilaabo saacadaha 3:00 galabimo ilaa 5:00 galabtii.

Jadwalkayaga caadiga ah ee addeega cuntadu wuxuu noqonayaa:

- **Isniinaha:** 2 maalmood oo cunto u dhiganta
- **Arbacooyinka:** 2 maalmood oo cunto u dhiganta
- **Jimcayaasha:** 3 maalmood oo cunto u dhiganta

Liistada oo dhammeystiran goobaha cuntada laga qaadanayo waxaad ka heli kartaan [Shabakadayada Cuntada Xilliga Dayrta Meals](#). Qoysaska waxaan ku soo dhaweyneynaa inay soo booqdaan goob kasta oo iskuulada ka mid ah oo cunto laga bixinayo iyada oo aan shuruud looga dhigayn in goobta iskuulkaasi ee cuntada laga bixinayo ay caruurtiisu ee iskuulkaasi wax ka barato. Uma baahnidin inaad isdiiwaangalisaan ama aad tustaan aqoonsiga ardaygiina (ID) marka aad timaadaan goobta. Dhammaan goobaha cuntadu waa bannaanka iskuulada, balse waxaan idinka codsneynaa inaad soo daboosahaan afka/sanka iyo inaad kala fogaataan marka aad cuntada ka qaadanaysaa goobta.

Portland Public Schools



Reimagining Education During the Pandemic

Waxa aanu sii wadi doonaa inaad idin wargalino marba wixii cusub ama isbedel ah ee lagu sameeyo addeega cuntada. Wixii macluumaad dheeraad ah ama gargaar ah, fadlan waxaad la xiriirtaan Waaxda Addeega Cuntada ee telefoonkeedu yahay 503-916-3399 or nutritionservices@pps.net.